**Kaalmada dhaqaale**
Xafiiska Maamulka Arrimaha Bulshada ee xaafadaha magaalada Hoose, Hisingen, Koonfur-galbeed iyo Waqoyi-bari

Göteborgs Stad

# Macluumaad ku saabsan kaalmada dhaqaale

# Waa maxay kaalmo dhaqaale?

Qof kastaa marar ka qaar waxa ku adkaan kara dhaqaalaha. Adiga aya marka hore leh masuuliyadaada la xariirta inaad xallisatid xaaladaada dhaqaale. Kaalmada dhaqaale waxay u shaqaysaa sida caawimad kama dambays ah oo loogu talogalay kuwa ay haysato dhibaatooyin maaliyadeed ee ku meel gaar ah. Gargaarku waa inuu daboolaa waxyaabaha ugu muhiimsan, sida cuntada, dharka iyo hoyga. Hadafku waa in aad isku filnaan kartid caawimo dhaqaale la'aan.

## Yaa heli karo kaalmo dhaqaale?

Waxa laga yaabaa in aad xaq u yeelato caawimo dhaqaale haddii aanad haysan dakhli ku filan ama hanti (sida lacag kaydah) oo aanad awoodin waxyaabaha ugu daruurisan. Had iyo jeer waxaad xaq u leedahay inaad codsato caawimo maaliyadeed la naqiimeeyo codsigaaga. Haddii codsigaaga la diido gebi ahaan ama qayb ahaan, waa inaad heshaa go'aan qoraal ah. Waxaad racfaan ka qaadan kartaa go'aanka.

Wax badan ka sii akhri qaybta ah Haddii codsigayga la aqbali waayo. Marka xafiiska adeegga bulshadu uu go'aan ka gaarayo kaalmada dhaqaale, waa in aan sameynaa qiimeyn shakhsi ah oo ku saabsan baahida. Xigasho-sharci: Sharciga Adeegga Bulshada (SoL) Cutubka 4aad Qaybta § 1faqrdiisa 1aad iyo Qaybta § 2-6 iyo Cutubka 4aad, Qaybta 1aad, Faqradiisa 2aad ee SoL.

## Intee in le'eg oo kaalmo dhaqaale ah ayaan heli karaa?

Inta aad heli karto waxay ku xidhan tahay, waxyaabo ay kamidyihiin dakhligaaga, inta qof ee qoyskaaga ka tirsan iyo kharashyada aad haysato.

## Maxay tahay in kaalmada dhaqaale loo isticmaalo?

Maciishad:*

- cunto
- dhar, kabo
- ciyaar,waqtiga-firaaqada, caymiska carruurta
- qalabka la isticmaalo
- caafimaadka, nadaafadda
- wargeysada maalinlaha ah, taleefoon

**Cadadka kharashyadaas waxaa laga soo qaatay heerka qaran, kaas oo ay xisaabiso oo ay dawladdu go'aamiso sannad kasta waana isku mid Iswiidhan oo dhan.*

Kharashaadkaaga la xariira:

- hoyga
- korontada guriga iyo qadka internetka
- caymiska guriga
- safarrada shaqo
- daawaynta caafimaad, daawo, daryeelka ilkaha
- kharashka xubinnimo ee ururada iskaashatooyinka iyo qasnadda shaqo la'aanta
- Heerka kharashku waa inuu noqdaa mid macquul ah. Taas macnaheedu waa in qiimayntu ay ku salaysnaato baahiyahaaga iyo xaaladdaada, laakiin waa in sidoo kale, tusaale ahaan, la tixgeliyo waxa uu caadiyan ahaan awoodo qof dakhligiisu yar yahay.

## Xaaladaha qaarkood, waxaad sidoo kale codsan kartaa in caawinaad lagaa siiyo kharashyo kale:

- alaabta guriga,maacuunta guriga,telefishinka iyo wixii la mid ah
- kharashaadka guuridda
- qalabka dhallaanka
- ookiyaala

## Sidee dakhligeygu u saameeyaa kaalmada dhaqaale?

Inta kaalmada dhaqaale ee aad heli karto waxay ku xidhan tahay inta dakhligaagu la egyahay iyo hantida aad haysato. Waa kuwan tusaalayaal la xariira dakhliga iyo hantida saameeya kaalmadaada dhaqaale:

- mushaar
- lacagta soo gasha bangiga sida swish-ka
- howlgabka/gunnada biilka duqowda
- lacagta gunnada jirrada
- gunnada jirrada-iyo hawlqabadka
- lacaga gunnada waalidka
- sanduuqa shaqo la'aanta iyo sanduuqa alfa
- kaalmada hawlqabadka
- kaalmada waxbarashada/CSN
- deeq waxbarasho
- lacagta taageerada waalidka
- lacagta carruurta ee guud/hawlgabka caruurta iyo lacagta dheeriga ah ee carruurta badan
- canshuur celinta
- hantida, sida tusaale ahaan lacag taala bangiga, saami shirkadeed, miisaaniyad saami, lahaansho baabuur, lacagta kiribtiga ama wax kale oo qiimo leh oo ay fududahay in la gado.

## Sideen u codsadaa kaalmada dhaqaale?

**Wac xaruunta xariirka**
**031-365 00 00** si aad ula xiriirto adeega bulshada ee meesha aad ku nooshahay. Waa ay ku caawiyaan adigoo wax weydiin karo kana jawaabayo su'aalo,ka dibna waxay kuu soo dirayaan macluumaadka iyo foomamka aad u baahan tahay. Xusuusnow inaad sheegtid haddii aad u baahan tahay turjumaan.

## Maxaa la iiga baahan yahay si aan u helo kaalmo dhaqaale?

Haddii aad shaqo la'aan tahay, waxaa loo baahan yahay in aad iska diiwaan geliso xafiiska shaqada oo aad si firfircoon u raadiso shaqo. Waa inaad sidoo kale ka qayb qaadataa barnaamijka xafiiska shaqada ama hawlaha gargaarka suuqa shaqada ee degmada haddii lagu siiyo.

Haddii aad ku jirto fasax jirro, waa inaad haysataa caddayn jirro oo sugan. Waa inaad sidoo kale ka qaybqaadataa tallaabooyinka baxnaaninta ee ay daryeelka caafimaadka iyo degmadu kuu qorsheeyeen.

Haddii aad xaas tahay ama aad wada nooshihiin, labadiinuba waxaa idinku waajib ah inaad is biishaan. Labadiinaba waxaad mas'uul ka tihiin dhaqaalaha qoyska waana inaad si wadajir ah u codsataan kaalmada dhaqaale.

## Macluumaadyadee baa looga baahan yahay codsiga?

Si loo baaro xaqa kaalmada dhaqaale, waa inaad keentaa xog sax ah oo ku saabsan dhaqaalahaaga. Macluumaadka loo baahan yahay waxaa ka mid ah:

» hoy iyo dadka wada degan
» dhakhliyada
» hantida
» kharashaadka
» shaqada iyo waxbarashada

## Ka warbixi isbeddellada ama haddii dakhligaagu isbeddelo

Waa in aad ogaysiisaa xafiiska arrimaha bulshada haddii dakhligaagu isbeddelo inta lagu jiro wakhtiga aad qaadanayso kaalmada dhaqaale. Sidoo kale noo soo sheeg haddii aad shaqo hesho, aad noqoto lammaane qof la degan, haddii carruurtu guurto ama haddii aad bilowdo waxbarasho.

## Maku qasbanahay inaan dib u bixiya?

Xafiiska adeegga bulshadu lacag ma amaahiyaan. Xaaladaha qaarkood, waxaa laga yaabaa inaad heshid kaalmo dhaqaale oo soo celineysid, waxaa kugu waajib ah inaad dib u bixiso. Waxa kale oo dhici karta in aad dib u bixiso, haddii aad si khalad ah ku heshay lacag caawimo oo badan ama aad bixisay macluumaad khaldan. Haddii aad si badheedh ah khalad uga bixisay war been ah, waxaa loo arkaa xad-gudub tuhun dambi dhaqaale xadid ah waxaana laga yaabaa inay horseeddo in la wargeliyo booliiska.

## Maxaa ku dhacaya xogtayda?

Xafiiska adeegga bulshada waxaa ku waajib ah in uu diiwaan geliyo macluumaadka muhiimka ah si uu u awoodo in uu ka baaraandego codsigaga. Waxaad xaq u leedahay in aad akhrido waxa lagaa qoray, waxa kale oo aad xaq u leedahay in aad wax ka ogaato haddii aad u malaynayso in ay wax khaldan yihiin ama haddii aad fikrad kale ka qabto. Dukumeentigu waxa la kaydiyaa shan sano kadib marka uu xafiiska adeega bulshadu xidho kiiskaaga.

Xafiiska adeegga bulshadu wuxuu leeyahay xog dhowris. Taas macneheedu waxa weeye in xafiiska adeega bulshadu aanu u siidayn macluumaadka adiga kugu saabsan cid aan loo ogalayn. Xafiiska Maamulka Bulshadu ma bixiyo tirokoob ama noocyo kale oo macluumaad ah si macluumaadkaaga shakhsi ahaaneed loo shaaciyo.

## Lacag bixinta

Si aan lacag kuugu soo dirno, akoonkaaga waa in lagu xidhaa nidaamka lacag bixinta ee ay isticmaasho degmada ee loo yaqaan (SUS). Haddii aad haysato aqoonsi elektaroonig ah, adiga laftaadu waxaad ka diiwaan gelin kartaa diiwaanka akoonada ee bangiga Swedbank. Waxaad sidoo kale buuxin kartaa foomka SUS ee aad naga heshay oo aad u dhiibi kartaa bangigaaga.

Lacagtu sida caadiga ah waa inay ku soo dhacdaa akoonkaaga mid ka mid ah maalmaha ugu dambeeya ee bisha, haddii aad si sax ah u buuxisay codsigaaga oo aad ku soo gudbisay wakhtiga.

## Waa in aad gudbisaa codsiga bil kasta - dib u codsashada

Waxaad dib uga codsan kartaa boggayga goteborg.se ama codsiga warqadda.

Waa muhiim in dib-u-codsiga lagu sameeyo wakhtiga.

## Waa maxay macluumaadyada uu xafiiska adeegga bulshadu ka keensan karo hay'adaha kale?

Marka aad codsanayso kaalmada dhaqaale, waxaa ogolaansho ku bixineysaa in lagaa soo koontaroola Hay'adda xafiiska Shaqada, hay'adda qasnadda caymiska, caymiska shaqo la'aanta, Wakaaladda gaadiidka, Hay'adda hawlgabka, Hay'adda laanta socdaalka, hay'adda aruurinta daymaha, hay'adda taageerta ardayda, waxbarashada dadka waa wayn/SFI iyo Wakaalada Canshuuraha haddii loo baahdo si loo baaro codsigaaga

## Haddii codsigayga la aqbali waayo

Waxaad xaq u leedahay inaad hesho go'aan qoraal ah haddii codsigaaga la diido oo aadan wax lacag ah helin. Go'aanku waa inuu had iyo jeer ka koobnaadaa sabab caddaynaysa sababta laguu diiday

Haddii aadan ku qanacsanayn go'aanka, waxaad rafcaan ka qaadan kartaa go'aanka adiga oo qoraya sharraxaad waxa aad rabto inaad bedesho. Haddii aad u baahato, Xoghayahaaga xafiiska adeegga bulshada ayaa kaa caawin kara racfaan qorista. U gudbi racfaanka xafiiska adeegga bulshada. Haddii racfaanku ka kooban yahay macluumaad cusub, xafiiska adeegga bulshadu wuu bedeli karaa go'aankiisa. Haddii kale, racfaanka waxaa loo gudbiyaa Maxkamadda maamulka.

## Samee xisaab-tijaabin ah oo la xariirta suurtogalnimada in la helo kaalmada dhaqaale

Bogga **www.goteborg.se** waxaa ku yaal linkiga  xisaab-tijaabinta kaalmada dhaqaale ee xafiiska guddiga arrimaha bulshada. Waa xisaabin la fududeeyay oo ku siin karta fikrad ah haddii aad xaq u leedahay gargaar dhaqaale. Go'aamada xafiiska adeegga bulshada waxaa saameyn ku yeelan kara arrimo kale oo aan ahayn arrimo maaliyadeed oo keliya. Si aad u ogaato haddii aad heli karto kaalmo dhaqaale, waa in aad la xidhiidho xafiiska adeegga bulshada deegaankaaga ee magaalada.

## Baahi caawinaad

Xafiiska adeegga bulshadu waxa ay u xilsaaran yihiin inay ku taageeraan sidii aad naftada u biili lahayd. Ka sokow caawimada qaabka lacagta ah, waxa laga yaabaa inaad u baahato caawinaad kale. Waxay noqon kartaa taageero si aad shaqo u raadsato, aad u hesho tababar shaqo, dhammaystirto waxbarashadaada ama aad qayb ka noqoto baxnaanin.

Waxaa laga yaabaa in shuruud lagaaga dhigo ka qaybqaadashada caawinaadda si aad xaq ugu yeelato kaalmo dhaqaale.

# Macluumaad dheeraad ah

La xidhiidh xafiiska arrimaha bulshada ee xaafaddaada adigoo wacaya **031-365 00 00** ama booqo bogga internetka ee **www.goteborg.se**.

Bogga **Mina sidor** ee goteborg.se waxaad ka heleysaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan adeegyada iyo arrimaha aad ka leedahay magaalada Göteborg.

Göteborgs Stad 220209-001-010 2022